


Jojo

Aqoonso
rabshadaha.
Raadso
caawimaad.

U istaagida
tacadiyada
ka dhanka ah
haweenka iyo
gabdhaha



NUXURKA



HORDHAC 5

**AGOONSO RABSHADAHA,
HEL CAAWIMAAD** 6

WAA MAXAY RABSHAD? 8

**TANI WAA MEESHA AAD
KA HELI KARTO CAAWIMAAD** 24

**Khadka caawinta haweenka ee
rabshadaha/adeegga xaaladaha
degdegga ee 24-saac ah
ee loogu talagalay haweenka** 25

Booliiska 26

**Xarumaha ka hortagga
rabshadaha** 28

Hoyga haweenka 30

Caawimaad onlayn ah 32

MACLUUMAADKA SHARCIGA 34

Xarunta
Haweenka

FRAUEN ZENTRUM

ÖIF ÖSTERREICHISCHER
INTEGRATIONS
FONDS

Adeegyada la-talinta shakhsi ahaaneed iyo is-dhexgalka ee loogu talagalay haweenka soogalootiga ah.

Saacadaha la-talinta, siminaarada iyo doodaha ku saabsan mawduucyada sida shaqada iyo waxbarashada, koorsooyinka luqadda Jarmalka, caafimaadka, qoyska, ka hortagga rabshadaha iyo aayo-ka-tashiga. Adeegyadu waa lacag la'aan.

ÖIF-FRAUZENTRUM

📍 Landstraßer Hauptstraße 26
1030 Wien

☎ 01 715 10 51 113

✉ frauen@integrationsfonds.at

Adeegyo gaar ah oo loogu talagalay haweenka ayaa laga heli karaa dhamaan Xarumta Isdhexgalka ee ÖIF.



integrationsfonds.at/frauen

HORDHAC

Rabshadaha waxay saamayaan haween iyo gabdho badan iyadoon loo eegayn asalkooda, dabaqadda bulshada ama diinta. Waxay ku reebaysaa raad maskaxeed iyo mid jireed taas oo dadka ay saamaysay rabshaduhu ay inta badan la dhibtoodaan inta ka dhiman noloshooda. Buug-yarahaan waxaa loogu talagalay in uu gargaar u noqdo dhammaan haweenka la soo kulmay ama la kulma rabshad/gacan-ka-hadal.

Naag ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad hesho nolal aad adiga raadsatay oo ka madax bannaan rabshado. Kaligaa ma tihid Awstaria, waxaad heli kartaa caawimaad. Hay'ado badan oo la-talin bixiya ayaa diyaar u ah inay ku siiyaan taageerada aad u baahan tahay.

Waa muhiim in dhammaanteen aan u istaagno xadgudubka ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha.

Susanne Raab

Wasiirka Federaalka ee Haweenka, Qoyska, Isdhexgalka iyo Warbaahinta

Franz Wolf


Agaasimaha

Hay'adda Deeqada Isdhexgalka Awstiriya

AQOONSO RABSHADAHA, RAADSO CAAWIMAAD


Xadgudubyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha waxay yeelan karaan qaabab badan. Buug-yarahaan wuxuu diiradda saarayaa rabshadaha jireed, maskaxeed, dhaqaale, galmo iyo kuwa dhaqanka.

Haweenka waxaa saameeya noocyo badan oo rabshado ah. Xaalado badan, haweenka ay saameynta soo gaartay kuma dhiiradaan inay ka hadlaan.



Dumarku inta badan xitaa ma ogaadaan inay la kulmeen rabshad. Rabshadu maaha xaalad la aqbali karo.

Buug-yarahaan waxa uu bixinayaa tusaalooyin kala duwan oo rabshado ah wuxuuna meelo ay la xiriiri karaan siinayaa haweenka ay saamayn ka soo gaartay rabshado oo ku sugan Awstariya oo dhan. Tani waa muhiim: Ka hadal, oo hel caawimaad!



WAA MAXAY RABSHAD?

Waa maxay rabshadaha jireed?



Qof ayaa si ula kac ah u waxyeeleeya jirka qof kale. Rabshadani waxaa lagu samayn karaa ficillo ay ka mid yihiin:

- > garaacid ama haraati
- > ceejin, timaha ka jeedis

Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa inuu qofku shay isticmaalo si uu rabshad u geysto.

Dhibanayaasha rabshadaha jireed waxay inta badan muujiyaan calaamado muujinaya in dhib loo geystay:

- > nabarro ama indho madow
- > xogmo, maqaarka oo wax gaara ama jeexma
- > gubniin

"Marka saaxiibkay uu xanaaqo, wuxuu iga jiidaa timaha ama nabar iga gaarsiiyaa cududdeyda."

"Ninkaygu wuu i garaacaa. Waan ka baqayaa isaga."


"Lammaankayga ayaa i waxyeeleeya. Wuu i laadaa wax ayuuna igu dhuftaa. Maxaa samayn karaa?"



Rabshadaha jireed marnaba lama aqbali karo!

Awstaria, waxyeelada jirka waa dembi. Kaligaa ma tihid Raadso caawimaad - eeg bogga 24 si aad u hesho meelo aad la xiriiri karto.

Waa maxay rabshadda maskaxeed?



Rabshadaha maskaxdu waxay ka dhigan tahay in qofka si ula kac ah uu qof kale ugu dhaawaco hadal ahaan ama qaab uu ula dhaqmayo.

Tusaale ahaan:

- > canaanasho, cay, bahdilid
- > rikaatayn, cadaadin, hanjabaad
- > xakamayn, daba-gal, la socosho
- > xiritaan, ka mamnuucista in wax xiriir ah uu qofku sameeyo, ka qaadista taleefanka gacanta ee qofka

Badanaa way dhib badnaan kartaa in la garto rabshadaha maskaxeed marka loo barbardhigo rabshadaha jireed. Qofka kuma reebto raad muuqda oo bannaanka ah.

Natiijooyinkeeda waxay noqon karaan:

- > murugo, niyad-jab
- > isku kalsooni hooseysa
- > dhibaatooyinka xagga hurdada ah
- > ceeb dareemis, cabsi

"Ninkaygu wuu i canaantaa wuuna i caayaa. Wuxuu i dhahaa waad fool xunahay waxaadna tahay doqon."



"Saaxiibkayga wuu i xakameeyaa. Wuu maseyraa mana rabo inaan rag kale la hadlo. Waxaan dareemayaa inaan meel ku xayiranahay."

"La iima ogola inaan ka baxo guriga keligey. Ma haysto eleefan, la iimana oggola inaan la xiriiro saaxiibaday."



Rabshadaha maskaxeed marnaba lama aqbali karo!

Gofna looma ogola inuu qof kale canaanto, caayo ama xakameeyo. Raadso caawimaad - eeg bogga 24 si aad u hesho meelo aad la xiriiri karto.




Waa maxay xadgudubka galmo?

Galmada waa in kaliya ku lug yeelato waxa ay qollooyinka galmada sameeynaya ay ku heshiiyaan. Wixii "maya" la yiraahdo waa in had iyo jeer la qadariyo. Galmada waa inaysan ku dhicin cadaadis, qasab ama xoog. Qof kasta oo ku lug leh waa inuu raali ka yahay. Haddii kale waa xadgudub galmo.


Arrintani waxay ku lug yeelan kartaa waxyaabo ay ka mid yihiin:

- in lagu taabto adiga aanad doonayn in lagu taabto
- handadaad (qaylo yesid ah, kaftan aan habboonayn ama sawiro)
- kufsi (dhammaan xaaladaha qofka lagu qasbay inuu galmo sameeyo, oo ay ku jirto lammaanayaasha)


Dhibbanayaal badan ayaa dareema xishood mana rabaan inay ka hadlaan. Laakiin waa muhiim in aad kala hadasho qof. Tani ma aha qaladkaaga. Dembiilayaasha ayaa khaladka leh, had iyo jeer.



"Qof aan is-naqaano ayaa in badan taabta jirkayga. Wuxuu igala hadlaa wax ku saabsan galmada. Laakiin arrintaan waxaan u arkaa mid aan ku qancin mana rabo."



"Ma doonayo caruur kale. Laakiin ninkeyga wuxuu igu khasbaa galmo aan difaac lahayn. Waxa uu igu dhahaa in ay tahay waajib saaran naagta."



"Ninkaygu wuxuu igu qasbaa inaan galmo la sameeyo. Laakiin ma rabo. Wuu i waxyeeleeyaa."

Xadgudubka galmo marnaba lama aqbali karo!

Waa muhiim inaad qof la hadasho. Kaligaa ma tihid Raadso caawimaad - eeg bogga 24 si aad u hesho meelo aad la xiriiri karto.

Waa maxay rabshad dhaqaale?



Rabshadaha dhaqaale waxaa loo isticmaalaa in qof loogu xoog sheegto, cadaadisna lagu saaro. Waxaa jira noocyo kala duwan:

- Naagtu waxay shaqaysataa lacagteeda. Ninkeeda ayaa ku qasbaya inay siiso dhammaan dakhligooda ama wuxuu ka mamnuucayaa inay furato akoon bangi oo iyada u khaas ah.
- Ninka ayaa ka mamnuuca xaaskiisa inay shaqeyso oo ay shaqeysato lacag iyada u gaar ah.
- Ninka inuu leeyahay dakhli naagtiisuna aysan waxba haysan. Wuxuu siiyaa lacag yar oo ay guriga ku maamusho, iyo lacag yar oo ay ku maareyso carruurta.

Haddii labada lammaane ay haystaan dakhli, labaduba waa inay iska kaashadaan kharashyada goyska. Guurka wada joogista ah, xuquuqda, waajibaadka iyo mas'uuliyadda waa in si cadaalad ah loo qaybsadaa.

"La iima ogola inaan isticmaalo lacagtayda. Goyskaygu oggola arrintaan. La iima ogola inaan furto akoon bangi oo ii gaar ah."



"Waxaan rabaa inaan ka tago ninkeyga. Laakiin wuxuu ii sheegaa inaan haysan wax lacag ah oo aanan isku filnaan doonin."

"Saaxiibkay iima ogola inaan iibsado dhar. Waxa uu ii sheegaa inay tahay lacagtiisa maadaama uu isaga shaqeysto."



Rabshadaha dhaqaale marnaba lama aqbali karo!

Lammaanahaagu xaq uma laha inuu waxba kaa mamnuuco. Raadso caawimaad - eeg bogga 24 si aad u hesho meelo aad la xiriiri karto.




Waa maxay rabshadaha dhaqanka?

Rabshadaha dhaqanka waxay yeelan karaan qaabab badan. Dhammaantood waxay la xiriiraan fikradda "caadada/dhaqanka". Dhibanayaasha "caadadaan" waxaa u badan haweenka.

Xadgudubka dhaqameed waxaa ka mid ah:

- > rabshadaha la xiriira difaacida sharafta
- > guur qasab ah
- > gudniinka taranka (FGM/C)




Waa maxay rabshad Loo sameeynayo ilaalinta "sharafta"?




Awstiriya gudaheeda, haweeneydu waxay u noolaan kartaa si kasto ay jeceshahay.

Ragga ama qoysaska qaarkood waxay aaminsan yihiin in sharaftoodu ay ku xiran tahay hab-dhaqanka "saxda" ee gabdhahooda ama naagtooda. Dumarka looma ogola inay go'aanadooda gaaraan. Qoysasku waxay inta badan cadaadis saaraan haweenka. Qaar baa xataa u hanjaba, rikaateeya, ama dila haweenka.

**Waa maxay
guurka khasabka ah?**



Nin ama qoys ayaa ku qasbaya gabar inay guursato nin. Haddii aysan rabin, way u hanjabaan, rabshad ayay kula kacaan ama xataa dibadda ayay u afduubaan (afduub). Badanaa, guurka qasabka ah wuxuu sidoo kale ku lug leeyahay noocyo kale oo rabshado ah (maskaxeed, jireed, rabshad galmo). Marka la joogo Austriya, guurka qasabka ah waa mamnuuc waxaana lagu mutaysan karaa ciqaab sharciyeed.




**Waa maxay
gudniinka fircooniga ah ee
dumarka?**




Inta lagu jiro gudniinka fircooniga ah ee dumarka (FGM/C), qayb ka mid ah ama dhammaan xubnaha galmada ee gabadha ayaa la gooyaa.

Inta badan waxaa la sheegaa in gudniinka xubinta taranka uu qeyb ka yahay dhaqanka iyo hiddaha. Si kastaba ha ahaatee, gudniinka xubinta taranka ma aha dhaqan balse waa dhaawac halis ah oo jirka la gaarsiinayo waana sharci darro marka la joogo gudaha Awstariya. Sidoo kale waa sharci-darro in ilmaha gudniinka xubinta taranka looga qabanqaabiyo dibadda. Naafaynta xubinta taranka waxa ay dhaawacdaa jirka iyo ruuxda. Dumarku waxay inta badan la dhibtoodaan inta ka dhiman noloshooda. Cawaaqibta ka dhalan karta waxaa ka mid ah:


- (nafta halis geliya) caabuq sababa
- xanuun la dareemo xiliga galmada
- dhalmo la'aan sababa
- khatar ku ah nolosha hooyada iyo ilmaha marka ay dhalayso




"Waalidkeygu iima ogola inaan will la saaxiibo. Waxay dhahaan in taasi ay dhaawaceyso sharaftayada."




"Waxaan jiraa 18 sano waxaana rabaa inaan jaamacad galo. Laakin waalidkay waxa ay rabaan in aan guursado shisheeye Anigu ma aqaano ninka waanan ka cabsanayaa."



"Tan iyo markii la igu sameeyey gudniinka fircooniga ah waxaan dareemaa xanuun markaan kaadinayo. Maxaa samayn karaa?"



"Waxaan soo maray gudniinka xubinta taranka markaan carruur ahaa. Ninkaygu wuxuu sidoo kale rabaa in sidaas lagu sameeyo gabdhaheena. Laakiin ma rabo in taasi ay dhacdo. Maxaa samayn karaa?"



"Waxaan leeyahay uur waxaana i saameeyay gudniinka Fircooniga ah. Waxaan ka baqayaa inaan dhalo. Ma u baahnaan doonaa qalliin si aan u dhalo? Halkee ayaan ka heli karaa macluumaadk."

Rabshadaha dhaqanka marnaba lama aqbali karo!

Marka la joogo Awstiriya, haweenku waxay go'aan ka gaari karaan waxbarashada ama xirfadda ay rabaan inay yeeshaan ama cidda ay rabaan inay guursadaan. Gudniinka Fircooniga ah (FGM/C) iyo guurka khasabka ah halkan waa ka mamnuuc. Raadso caawimaad - eeg bogga 24 si aad u hesho meelo aad la xiriiri karto.

"Ninkayga si fiican iilama dhaqmo. Laakiin ma doonayo inaan isaga tago, sababtoo ah waxaan ka baqayaa inuu carruurta iga qaado."



"Kuma faraxsani guurkayga. La iima ogola inaan bannaanka u baxo oo ninkeyga ayaa i maamula. Waxaan ka baqayaa in la i masaafuriyo. Taasi waa sababta aan uga tagi karin."



"Luuqaddayda jarmalka ma fiicna shaqana ma haysto. Ninkaygu wuu i garaacaa. Laakiin ma rabo inaan kala tagno. Sideen u noolaan karaa keligay?"



"Qoyskaygu ma rabaan inaan galo koorso aan ku horumarinayo luuqaddayda Jarmalka. Waxaa la iigaga baahan yahay inaan guriga joogo oo aan carruurta ilaaliyo."



"Waxaan ka baqayaa ninkeyga. Halkee ayaan aadi karaa haddaan kala tagno? Ma rabo inaan noqdo guri la'aan."



"Waxaan ka baqayaa in la i masaafuriyo. Haddii aan dib ugu laabto, waxay igu qasbi doonaan in la igu sameeyo gudniinka xubinta taranka. Gudniinka fircooniga ah halkaas wuxuu ka yahay dhaqan. Maxaa samayn karaa?"



Rabshad/ku xadgudub marnaba lama aqbali karo!

Kaligaa ma tihid Ka hadal welwelkaaga iyo cabsidaada. Dhiirranow oo la xiriir hay'adaha, maamulka ama ururada la-talinta. Waxaad leedahay xuquuq waxaanad heli kartaa caawimaad.

Bogagga soo socda, waxaad ka heli kartaa ururada iyo dadka ku caawin kara.

TANI WAA MEESHA AAD KA HELI KARTO CAAWIMAAD

Caawimaad taleefanka lagu bixiyo

Haddii ay ku saamayso rabshad, waxaad la xiriiri kartaa khadka caawinta dumarka ee ka hortagga rabshadaha meel kasta oo aad ka joogto Awstariya.

Marka aad joogto gudaha Vienna waxaad sidoo kale wici kartaa adeegga xaaladaha degdega ah ee 24-saac shaqeeya ee loogu talagalay haweenka.

Waxaad ka heli kartaa talo xilli kasta, 24 saacadood maalintii.

Taladu waa qarsoodi waana bilaash. Qofna ma gudbin doono sheekadaada ama faahfaahintaada.

Markaad wacdo, waxaad la hadli doontaa khabiir. Waxaad u sheegi kartaa waxa dhacay ama dhibaatooyinka aad la kulmayso.

Khadka caawinta haweenka:
0800 / 222 555

Adeegga xaaladaha degdega ah ee 24-saacdood ah ee loogu talagalay haweenka (Vienna kaliya):
01 / 71719

Khabiirka ayaa isku dayi doonta inay ku caawiso. Waxay sidoo kale kuu sheegi doontaa meelaha kale ee aad ka heli karto caawimaad - iyadoo ku xiran waxaad u baahan tahay. Waxaad weydiin kartaa su'aalo kasta oo aad qabtid.

Haddii Luuqaddaada Jarmalka aanu aad u fiicneyn, waxaad sidoo kale talo ku heli kartaa luqado kale:

Adeegga xaaladaha degdega ah ee 24-saacdood ah oo loogu talagalay haweenka (Vienna kaliya): iyo kuwa kale, Bosnian/Croatian/Serbiyaan, Ingiriis, Farsi, Polish, Isbaanish

Khadka caawinta ee loogu talagalay dumarka: iyo kuwa kale, Bosnian/Croatian/Serbiyaan, Ingiriis, Farsi, Polish, Isbaanish

Haddii ay tahay xaalad degdeg ah: Wac booliiska!

Marka la joogo Awstiriya, dhammaan noocyada rabshadaha waa mamnuuc. Waxaad u dacwoon kartaa booliiska haddii lagu geysto rabshad.



Haddii aad khatar ku jirto, booliisku waxa ay goobta ama qofka khatarta ku gelinaya u soo saari karaan amar xannibaad.

Amarka xannibaadda ee dhismooyinka:
Lamaanahaagu hadda ma soo geli karo aqalka ama guriga.

Amarka xannibaadda ee dadka:
Lamaanahaagu waa inuusan kuu soo dhawaan wax ka yar 100 mitir.

Haddii loo baahdo, booliisku wuxuu sidoo kale soo xiri karaa lamaanahaaga.

Lambarka
Booliiska
ee xaaladda
degdegga ah:

133

Lambarka xaalada-
ha degdega ah ee
Yurub oo dhan laga
isticmaalo:

112

Markii aad ku jirto
xaalad degdeg ah,
waa inaad:

Qaadataa
taleefankaaga gacanta.

Aadaa meel nabdoon. Tusaale ahaan, qol
aad xiri karto. Ama aad ka tagtaa aqalka.


Wac lambarka xaaladaha degdega ah ee
booliiska (133) ama lambarka xaaladaha
degdega ah ee Yurub oo dhan laga
isticmaalo (112).

Marka hore sheeg meeshaad joogto.
Kadibna sheeg waxa dhacay. Ugu
dambeyntii faahfaahintaada bixi.

Booliisku ayaa kuu iman doonaan kuuna
caawin doonaan sida ugu dhakhsaha badan ee
suurtogalka ah!

Xarumaha ka hortagga rabshadaha

Ma rabshad baa ku saamaysay?
Xarumaha ka hortagga rabshadaha waxay ku siinayaan caawimaad iyo taageero.



Haddii aad ku jirto khatar degdeg ah, wac booliiska. Booliisku ayaa sidoo kale ku wargelin karaan xarunta kahortagga rabshadaha.

Gobol kasta oo Awstiriya ku yaala waxaa ku yaala xarun looga hortagga rabshadaha. Marka la joogo Vienna, xarumahaas waxaa loogu yeeraa hay'adaha faragelinta/waxqabadka.

Caawimaada waxaa lagu bixiyaa lacag la'aan iyo si qarsoodi ah marka la codsado.

Qof kasta ayaa la xiriiri kara xarumaha ka hortagga rabshadaha. Dhib ma laha meesha aad ka timid, jinsigaagu waxa uu yahay ama inta ay da'daadu tahay.

La-taliyayaasha xarunta ka-hortagga rabshadaha waxay kaa caawin karaan xaaladaha degdegga ah waxayna sugi doonaan badbaadada. La-taliyayaasha sharciga ayaa ku siin kara macluumaad muhiim ah.

Sheekadaada qofna loo sheegi maayo. Xarumaha ka hortagga rabshadaha ma gudbin doonaan macluumaadkaaga ama xogtaada.

Xarumaha ka hortagga rabshadaha waxay sidoo kale talooyin ku bixiyaan luqado kale.

Halkani waa meesha aad ka heli karto xiriirada gobolkaaga:
www.gewaltschutzzentrum.at



Hoyga haweenka

Xarumaha hoyga haweenku waxay ku siin karaan ilaalin iyo la-talin.

Waxaa dhammaan gobollada wadanka oo dhan ku yaala hoy loogu talagalay haweenka.

Goorma ayaan u guuri karaa hoyga haweenka?

Waxaad u guuri kartaa hoyga haweenka haddii aad ka weyn tahay 18 sano jir, aad la dhibtoonayso rabshad ama aad raadinayso in lagaa ilaaliyo rabshado.

Ma keeni karaa carruurta?

Dabcan waad soo kaxaysan kartaa carruurtaada. Hoyga haweenka waxaa jooga shaqaalada xannaanada carruurta ee tababbaran.

Xagee ku yaalaa hoyga haweenka ee ugu dhow?

Iskaan gareey koodhyadan QR-ka ah:

AÖF:



ZÖF:



Intee in le'eg ayaan joogi karaa?

Taasi waxay ku xiran tahay nooca ilaalinta ee aad u baahan tahay. Qaar waxay joogaan dhawr maalmood, qaarna sannad.

Lacag ma ku baxdaa in loo guuro hoyga haweenka?

Haddii aad leedahay dakhli, waxaad bixin doontaa wax yar. Haddii aanad haysan wax dakhli ah, waxaad ku joogi kartaa lacag la'aan.

Maxaa ka dhacaya hoyga haweenka?

Waxaa lagu siin doonaa qol iyo ilaalin. Waxaad xaaladaada kala hadli kartaa lataliyahaaga.

Maxaan sameeyaa haddii dugsiga carruurta uu fog yahay?

La-taliyayaasha ayaa ku caawin kara waxayna isku dayi karaan inay xal u helaan arrintaas.

Maxaa dhacaya haddii aan rabo inaan ku laabto ninkeyga?

Taasi waa go'aankaaga. Haddii aad u baahato caawimaad marlabaad, waxaad la soo xiriiri kartaa hoyga haweenka.

Caawimaad onlayn ah

Cinwaanada

Waxaad xiriirada gobolkaaga ka heli kartaa www.bundeskanzleramt.gov.at/frauenserviceportal

Sidoo kale waxaad ku geli kartaa bogga QR koodhka ku yaala dhanka midig:



Sheekaysi




Ma ku jirtaa xaalad degdeg ah? Wax su'aalo ah ma qabtaa? Ma rabtaa inaad qof la hadasho? Websaydhka www.haltdergewalt.at, waxaad si qarsoodi ah ula hadli kartaa khabaro.

Luuqadaha diyaar u ah in lagu sheekeysto: Jarmal, Carabi, Boosniyan/Kraatiyaan/Serbiyaan, Ingiriis, Dari/Farsi, Faransiis, Talyaani, Polish, Ruush, Soomaali, Isbaanish iyo Turki.



Signaale bixi si aad u hesho caawimaad

Ma rabshad baa ku saamaysay? Adiga oo isticmaalaya astaanta gacanta "Signalka Caawimaadda" waxaad tusi kartaa dadka kale inaad u baahan tahay caawimaad, adigoo oran kelmad. Suulkaaga ku laab calaacasha gacantaada Dabadeedna farahaaga soo laab oo dulsaar suulkaaga.



MACLUUMAADKA SHARCIGA AH

Cinwaanka milkiilaha warbaahinta, daabacaha iyo tifaftirka:

Hay'adda Deeqda Isdhexgalka Awstiriya (ÖIF) – Deeq loogu talagalay Isdhexgalka Qaxootiga iyo Soogalootiga S Schlachthausgasse 30, 1030 Vienna
T +43(0)1/710 12 03-0, E office@integrationsfonds.at
Goobta daabacaada iyo soo-saarista: Schlachthausgasse 30, 1030 Vienna

Tafatirayaasha:

Yvonne Brandstetter, ÖIF
Sophia Gummerer, ÖIF
Christine Sicher, ÖIF

Sawirada iyo muuqaalada: Annett Stolarski, B.A.C.K. Grafik- und Multimedia GmbH

Daabacadda: Gerin Druck GmbH

Hawlgalayaasha iskaashiga: FEM Süd, Austrian Red Cross

Shaac-ka-qaadis sida ku cad Qeybta. 25 ee Sharciga Warbaahinta Awstiriya (MedienG):

Dhammaan macluumaadka ku saabsan milkiilayaasha warbaahinta iyo tilmaan-bixinta aas-aasiga ah ee warbaahintaan waxaa laga heli karaa www.integrationsfonds.at/impressum.

Afeef:

Macluumaadka ku jira warbaahintan waa la baaray oo waxaa loo soo saaray si taxadar leh. Wax mas'uuliyad ah oo la aqbali karo lagama qaadayo saxnaanta, dhammaystirnaanta ama ansaxnimada macluumaadka ku jira halkaan. Hay'adda Deeqda Isdhexgalka Awstiriya iyo qollooyinka kale ee ku lug leh soo saarista warbaahintan midkoodna mas'uul kama aha nooc kastoo khasaaro oo ka dhasha isticmaalka, dhaqangelinta iyo dib u daabicida waxa ku jira warbaahintan. Maadaama ay warbaahintan ay ku jiraan xiriirada/tixraacyada warbaahinada kale ee qollooyin saddexaad ah kuwaas oo Hay'adda Deeqda Isdhexgalka Awstiriya aysan saameyn ku lahayn, wax mas'uuliyad kama qaadayno macluumaadka ku jira warbaahintan. Milkiilaha warbaahinta ayaa mas'uul ka ah saxnaanta macluumaadka ku jira warbaahinta qollooyinka saddexaad. Wax ku biirinta daabacaadan waxay ka tarjumaysaa fikradaha iyo aragtida qorayaasha oo qasab maaha inay matalayaan fikradaha, gaar ahaan fikradaha siyaasadeed, ee daabacayaasha, Hay'adda Hay'adda Deeqda Isdhexgalka Awstiriya ama Wasaaradda Federaalka ee Haweenka iyo Isdhexgalka ee Dhismaha Dawladda.

Xuquuqda daabacaada:

Dhammaan macluumaadka ku jira warbaahintan waxa ilaalinaya xuquuqda daabacaada. Wax nuqul ka bixin ah, habayn, qaybin iyo sahmin ah, ha ahaato farsamo ahaan mid suurtagal ah hadda ama mustaqbalka oo keliya, iyo haddii ay bilaash tahay ama lacag lagu bixinayo, waa mamnuuc iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga helin haystaha xuquuqda daabacaada.

Khadka caawinta haweenka:
0800 / 222 555

Adeegga xaaladaha
degdegga ah ee
24-saacadood ah ee loogu
talagalay haweenka
(Vienna kaliya):
01 / 71719

Lambarka
Booliiska
ee xaaladda
degdegga ah:
133

Lambarka xaaladaha
degdega ah ee Yurub
oo dhan laga isticmaalo:
112